



"**dheh :laa ilaaha Illaa Allaah waxdahu laa shariika lahu, Allaahu akbar kabiiran, wal xamdu lillaahi kasiiran, subxaana Allaahi Rabbil caalamiin, laa xawla walaa quwata illaa billaahil-casiisil xakiim**

Sacad-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Nin reer miyi ah ayaa u yimid Nabiga-naxarii iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, wuxuuna ku yiri: i bar hadal aan dhoho, wuxuuna ku yiri: "dheh :laa ilaaha Illaa Allaah waxdahu laa shariika lahu, Allaahu akbar kabiiran, wal xamdu lillaahi kasiiran, subxaana Allaahi Rabbil caalamiin, laa xawla walaa quwata illaa billaahil-casiisil xakiim" wuxuu yiri -ninkii-: hadalkaani rabbigay ayaa lehe maxaan anigu leehay? wuxuu yiri-Rasuulku-: "waxaad tiraahdaa: Allahuma aqfir lii (Allahayow ii dambi dhaaf), warxamnii (ii naxariiso), wahdinii (i hanuuni), warsuqnii (i irsaaq)".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nin reer baadiye ah ayaa waydiiyey Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu baro wardi uu akhristo, Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ku yiri: dheh: "Iaa ilaaha Illaa Allaah waxdahu laa shariika lahu" wuxuu ku bilaabay shahaadada towxiidka Ilaahay, oo macneeedu yahay: majiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay wayne ahayn, "Allaahu akbar kabiiran" macnaeeduna: Ilaahay ayaa ka wayn wax walba, "Al-xamdu lillaahi kasiiran" macnaeeduna: Ilaahay ayey mahad badani u sugnaatay, waxay ugu sugnaatay sifooyinkiisa, ficilladiisa iyo nicmooyinkiisa aan la koobi karin, "Subxaana Allaah Rabbil-caalamiin" (Ilaahayga Rabul caamiinka ah ayaa nusqaan oo dhan ka nasahan). Macnaha: Ilaahay wuxuu ka nasahan yahay oo ka dahiran yahay nusqaan oo dhan, "Iaa xawla walaa quwata illaa billaah Al-casiisul xakiim" (xeelad iyo xoog ma laha cidaan ahayn Allaha Casiiska ah oo Xakiimka ah" macnaha: majirto cid xaalad taagan xaalad kale u badali karta in Ilaahay u gargaaro oo waafajivo mooyee" ninkii ayaa yiri: Ereyadaan Ilaahay ayey u sugnaadeen waana xuskiisa iyo waynayntiisa, ee maxaan anigu lee yahay oo aan naftayda ugu ducaystaa? Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: wuxuu ku yiri: waxaad dhahdaa: " Allahayow ii dambi dhaaf" oo iga tir-tir dambiyada oo iga Astur, "iina naxariiso" Adigo i soo gaarsiinaya nafaca iyo masaaliixda diineed iyo tan aduunba, "oo xaga igu hanuuni" oo igu hag waxa wanaagsan iyo jidka toosan , " oo i irsaaq" maal xalaal ah, caafimaad, kheyr kasta iyo caafiyah.

النّجّات الخيريّة
ALNAJAT CHARITY

